ROCKETSHIP
PUBLIC SCHOOLS

Reer Rocket,

Waxaan rajeyneynaa inaad ku raaxeysanaysid fasaxaaga xaggaaga, sanadkan aad buu u fiicnaa! Waxaan aad ugu faraxsanahay dhammaan bulshada Rocketship sida qof walba uu sida degdegga ah ugu istaagey si ay dadka reer Rocket u siiyaan waxbarashada onleenka ah ee tayada leh iyadoo lagu jiro musiibadaaduunka. Sidaas ayaa la idinka raabay reer Rocket!

Waxaan ognahay inay wali ay jiraan su'aalo badan oo la xiriira sida iskuulada dib loogu furi doono sanad dugsiyeedka dambe. Haka walwalin, kooxdeena khubarada ah waxay aad ugu dadaalayaan si ay u hubsadan inaan u diyaar garowno xaalad kasta iyadoo aan la shaqeynayno hoggaamiyeyaasha gobolka, Metro, iyo hoggaamiyeyaasha degmada si aan u raacno tilmaamaha caafimaadka, amniga, iyo waxbarashada. Waxaan idinla socodsiin doonnaa warbixin toddobaadle ah, oo ka bilaabanaysa hadda, illaa bilowga dugsiga.

Fikradihiina waa kuwo aad u qiimo badan si ay nooga caawiyaan go'aannadeena sannadka dambe. Waad ku mahadsan tihiin dhammaan waalidinteena ee dhammaystiray Xog-ururinta Qoyska ee ku-noqoshada-Iskuulka iyo kuwa kaqeybqaatay Kullamada Bulshada.

**Halkaan waxaa ku qoran dhowr warbixino oo aan rabno inaan idinla wadaagno:**

- **Keydso Taariikhda:** Calaamadeeyso kal-tirsigaaga, sababta oo ah iskuulku wuxuu u bilaawanaaya ilmaha yaryar Luulyo 27-keeda, fasalada afaraadna Luulyo 30-keeda, iyo dhammaan fasalada kalana 3-da Agoosto! Booqo Websaydka Nashville COVID-19 ee kal-tirsiga iskuulka 20/21. Waxaan sii wadi doonnaa inaan warbixinada ugu muhiimsan soo gelino boggan iyo sidoo kale taariikhaha Kinder Camp iyo Orientation. Warbixinadan waxaa sidoo kale la soo gelin doonaa kooxyada Facebook ee iskuulka.
- **Isgaarsiinada Toddobaadlaha ah:** Xog-uruurinteena qoyska, qoysaska intooda badani waxay codsadeen in warbixin toddobaadle ah loogu soo diro iimayl ahaan. Iyadoo hore loo soconaayo, waxaan iimaylka idin kugu soo diraynaa warbixino toddobaadle ah iyo qoraallo wata macluumaad ku saabsan sannad dugsiyeedka soo socda, warbixinada dib u furitaanka, iyo macluumaad kale oo muhiim ah. Waxaan sidoo kale macluumaadkaan soo gelin doonaa kooxyada Facebook-ga ee iskuulka - xaqiiji inaad ku biirto Kooxda Facebook-ga ee iskuulkaaga haddii aadan horey sidaas u samayn. Intaa waxaa sii dheer, waxaan sii wadaynaa qabashada kulammada bulshada toddobaadlaha ah ee Facebook-ga.
- **Bixinta Waxbarasho 100% Muuqaal ah**: Kulankeenii ugu dambeeyay ee Facebook-ga, waxaan ka ogaanay in badankiina aad doorbidaan in Sanad-dugsiyeedka 20.21 lagu bilaabo Waxbarashada Khadka ah. Waxaan sii wadaynaa inaan ka shaqeyno qorsheyaasha waxbarista ee xoogga leh waxaanan idin la wadaagi doonnaa faahfaahin dheeraad ah oo ku sabsan khibradeena muuqaalka dugsiga marka la gaaro kulamadeena soo socda ee bulshada. Waxbarashadeena khadka ah waxay ahayd tii ugu fiicneyd Nashville sanadkii la soo dhaafay iyadoo lahayd astaamo badan oo aysan bixin iskuulada kale intooda badan, oo ay ku jiraan waxbarista khadka tooska ah iyo tacliinta bulshada/shucuurta. Sanadkan, arday kasta oo reer Rocket ah wuxuu lahaan doonaa Chromebook u gaar ah maalinta ugu horeysa ee dugsiga.  Maalinta Qaybinta Chromebook way soo dhowdahay. Fadlan la soco!

ROCKETSHIP
PUBLIC SCHOOLS

- **Isku-diyaarinta Dib-ufurida 20.21:** Guddoomiye Lee ayaa hadda uun kordhiyey xaaladda degdegga ah illaa iyo 29ka Agoosto. Tani waa isbedel weyn ee dhanka dhacdooyinka. Inta lagu jiro usbuuca 6da Luulyo, waxaan idin la wadaagi doonnaa go'aankeena ugu dambeeya ee ku aadan inaan furi doono dhismayaashayada iyadoo la bixinayo xulashooyinka waxbarashada masaafada fog ah ama inaan ku bilowno sannadka waxbarashada masaafada fog oo 100% ah. **Midey noqotaba, waan u diyaar ahaan doonaa.** Cilmi baaris ay sameysay Akadeemiyada Cilmiga Caruurta ee Mareykanka (AAP) ayaa dhowaan lagu sheegay "in tixgalinta dhammaan qaanuunada sanad dugsiyeedka soo socda ay ku bilaabato hadaf ah in ardayda ay muuq ahaan iskuulka u yimaadaan. Muhiimadda ay leedahay waxbarashada qof ahaaneed ayaa si wanaagsan loo diiwaangeliyay, waxaana horeyba u jirtay caddeyn ah saameynta taban ee carruurta ay ku yeelatahay xiritaanka iskuulada gugii 2020. In kasta oo Rocketship Tennessee ay aaminsan tahay in lahaanshaha ardayda u yimaadaan dhismayaashayada waxbarista si shakhsiyeed ay bixin doonto waxbarashada ugu wanaagsan - **waxaan rabnaa inaan sidaas u samayno si badbaado leh oo waafaqsan tilmaamaha deegaanka.**

- **Tallaabooyinka Cusub ee Caafimaadka & Badbaadada:** Labadii bilood ee la soo dhaafay, waxaan la tashanay xirfadleyaasha caafimaadka guud ee deegaanka iyo kuwa qaranka, iyadoo dib loo eegayo tilmaamaha CDC, iyo la qiimaynayo sida nidaamyada iskuullada ee ka jira wadamada kale ay ugu guuleysteen dib u furitaanka xarumahooda. Waxaan sameyneynaa nidaamyo iyo borotokoolo cusub oo abuuraya lakabyo dhowr ah oo kahortag ah si loo yareeyo halista Covid-19 ee uu ku yeelanaayo xarumaheena iyadoo dhanka kalena aan abuureyno jawi waxbarasho ee ugu wanaagsan ee ardayda Rocket ay mudan yihiin. Waxaan faafaahin badan oo ku sabsan qorshayaashayada caafimaad iyo badbaadada idin la wadaagi doonaa usbuuca soo socda, marka digtoonow.

- **Xusuusin— Foomka Diiwaangelinta Onleenka Ah ee Gaadiidka & Teknoolajiyada ugu dambeyntiisa waa Jimcaha:** Isniinta, waa inaad heshay lifaaqa foomka diiwaangelinta onleenka ah ee iskuulkaaga kaas oo la xiira gaadiidka iyo tikniyoolajiyadda. Waxaan u baahan nahay qoys walba inay buuxiyaan foomkan ugu dambeyn Jimcaha. Haddii aad ka soo baxdid waqtiga kama dambeysta ah, waxaa lagugu dari doonaa tartan $25 kaarka Kroger ah ama kaarka hadiyadda ee Visa ah $50.

**Warbixinada Mustaqbalka:**

- Qorshaha dib u furida oo faahfaahsan
- Taariikhaha xeryaha barbaarinta iyo jiheynta
- Qawaaniinta iyo borotokoolada caafimaadka iyo badbaadada
- Macluumaad loogu talagalay ilmaha ee ku saabsan waxa laga filan karo sanad dugsiyeedka dambe

Si daacad ah,

James Robinson
Agaasimaha Iskuulada